# Kaarka Caafimaadka iyo Uurka

Medical Assistance and Pregnancy

## Waa maxay Kaarka Caafimaadka (MA) iyo Kaarka (MA) ee ay Maal-geliso CHIP?

**Kaarka Caafimaadku ee (MA)** waa barnaamijka (Medicaid) ka ee Minnesota ee la siiyo dadka danyarta ah. Kaarka (MA) waxa uu siiyaa daryeelo caafimaad oo lacag la'aan ah ilmaha iyo qoysaska, **haweenka uurka** leh, dadka waaweyn ee ilmaha aan lahayn, waayeelka, iyo dadka indhaha la' ama naafadda ah.

**Kaarka (MA) ee ay maal-geliso CHIP, ama MA-Pregnant,** waxaa heli kara **haweenka uurka** ee aan heli karin kaarka (MA) ee caadiga ah sababta oo ah waxa aysan ku lahayn wadanka sharci, ama kaliya waxa ay leeyihiin sharci (immigration) ku meelgaar ah ama ma aha muwaadiniin.



Kaarka caafimaadka ee MA-Pregnant waxa uu kuu bilaaban karaa kolka aad is tiraahdo uur baad leedahay. Kaar ku jiridu waxa ay kolkaa socotaa **12-bilood** uurka ka dib. Waqtiga ka dambeeya kolka uurku uu dhamaado waxaa la yiraa mudadda dhalmada ka dambaysa.

**Ogow**: **Mudadda dhalmada ka dib ah** waxa ay bilaabantaa maalinka uurka uu **dhamaado**. Ma quseeyso in dhalmo ay jirto iyo in kale.

## Ma heli karaa kaarka (MA)?

Haddii aad uur leedahay ama aad ku jirto mudadda dhalmada ka dambaysa, waxaa dhici karta inaad xaq u leedahay kaarka (MA-Pregnant).
Waxa aad u baahan tahay:

- inaad uur leedahay ama aad ku jirto mudadda 12-biood ah ee dhalmada ka dambaysa.
- aad ka soo baxdo shuruudo kale oo kaarka (MA) uu leedahay, sidda heerarka dakhliga.

Waxaa ku jirta Akhbaar kale oo ku saabsan xaq u yeeladka "MN Health Care Programs Eligibility Policy Manual" *(Buuga Yar ee Nidaamka Xaq u Yeeladka ee Barnaamijyada Caafimaad ee MN)* ee ku jira Shabakada (website) Waaxda Adeega Bulshada (DHS) ee: https://mn.gov/dhs. *(ingiriisi kaliya)*

Haddii kaarka (MA) aad *xaq ugu yeelato uur awgii,* waxa aad ku jiri kaarka bisha ilmahu calool galo ilaa iyo dhamaadka mudadda 12-biloodka ah ee dhalmada ka dambaysa. Wax saameynana kuma leh arrintani hadii ay wax iska bedelaan dakhliga, baaxada qoyska ama shuruudaha cusboonaysiinta.

## Ma heli karaa kaarka (MA) haddii aanan si sharci ah ku joogin halkan?

Haa. Haddii aad uur leedahay aadana sharci wadanka ku lahayn, waxaa dhici karta inaad hesho kaarka (MA-Pregnant) ee ay maal-geliso CHIP ama Kaar Caafimaad oo Degdeg ah (EMA). Haddii aad codsato ama jaa aad haysato kaarka (MA) ee ay maal-geliso CHIP ee haweenka uurka leh ama kaarka (EMA), khasab kuguma aha inaad bixiso lambar Sooshal Sakuurti (Social Security) ama aad sheegto sharcigaaga. Eeg warqada xogta aruursan ee ku saabsan *Daryeelka Caafimaadka Degdegga ah (EMA)..*

Waxa dhici karta inaad xaq u yeelato kaarka (MA-Pregnant) ah oo ay meel-geliso CHIP haddii:

- sharci aadan lahayn ama aad tahay qof aan muwaadin ahayn oo aan heli karin (MA),
- dakhligaagu uu yahay $4,568 ama uu ka yar yahay bishii. Tani waxa ay ka hadli qoyska 2 da ah (adiga iyo uur-jiifkaagu = 2). Xadka dakhligaaga kor ayuu aadi haddii ay jiraan dadka kale oo qoyskaaga ah.
- aadan ku jirin kaar kale oo daryeel caaafimaad ah, iyo
- aad tahay qof degan Minnesota

Waxaa ku jirta Akhbaar kale oo ku saabsan xaq u yeeladka "MN Health Care Programs Eligibility Policy Manual" *(Buuga Yar ee Nidaamka Xaq u Yeeladka ee Barnaamijyada Caafimaad ee MN)* ee ku jira Shabakada (website) Waaxda Adeega Bulshada (DHS) ee: https://mn.gov/dhs. *(ingiriisi kaliya)*

## Siddee ayaan u dalbadaa?

Haddii aad uur leedahay, ama aad u malaynayso inaad uur leedahay ka codsato kaarka (MA) halkan www.MNSure.org. Haddii aadan heli karin kaarka (MA) ee caadiga ah sababta oo ah sharci (immigration) la'aan awgii, waydii xafiiska dhaqtarkaaga la shaqeynta hage lacag la'aan ah ama qofka kale oo la aaminsan yahay si aad u dalbato. Ama la xiriir barnaamijka Project Care si aad uga hesho caawimaada bilaashka ah garwadaanka sharciyeysan ee MnSure ee khadkiisu yahay 320-253-1021 ama projectcare@mylegalaid.org.

Waxaad kaloo ka dalban kartaa xafiiska cayrta ee degamadaadda.

## Ka waran haddii aan jaa leeyahay kaarka (MA)?

Haddii aad ku helayso kaar (MA) ah ama kaar (MA) ah oo ay maal-gelisay CHIP uur awgii, waxaad toos ugu jiri kaarkaa muddo 12-bilood ah ka dib kolka uurku uu dhamaado. Inaad waxba adigu sameysid ma aha.




## Ciddee ku jirta Kaarka?

MA-Pregnant ay maal-geliso CHIP ku waxa ay fidiyaan ku jirid noocyo badan oo daryeelo (MA) ah. Ku jirida kaararku kuma koobna kaliya daryeelada la xiriira uurka uun. Xilliga uurka iyo mudadda 12-bilood ah ee dhalmada ka dambeysa, waxa aad ku jirtaa oo lagaa bixin waxyaabaha sida:

- Booqashooyinka dhaqtarka iyo rugaha caafimaadka
- Cisbitaalada iyo adeegyada daryeelka Haweenka ee (OB/GYN)
- Daryeelada ilkaha ah
- Caafimaadka madaxa ah iyo adeegyo wax ka qabadka isticmaalka mukhaadaraadka ah
- Dawooyinka
- Qalabka Caafimaadka – sidda mashiinka caanaha la isa galiso iyo qalabka cabirka dhiig-karka

Ka eeg bogga Soo koobidda Caymiska, kharashka la Wadaago iyo Soohdimaha wixii akhbaar ah ee ku saabsan liiska adeegyada la bixiyo kharashkooda. Gal shabakada https://mn.gov/dhs.

→ Riix "*eDocs document library" ee* ku taal dhinaca kore ee midig ee bogga
→ Geli 3860 santuukha baarida
→ Riix "Somali - Af Soomaali" iyo Riix "Search"



## Manfacyada Kale

Haddii aad xaq u leedahay kaarka (MA) maalinta aad dhasho, ilmahaaga waxaa loo tixgelin waxa la yiraa "dhalashada cusub." Taa macnaheedu waa ilmahaagu durbadiiba waxa uu xaq u yeelan kaarka (MA) **1 sanno**. Dhalashooyinka cusubi ma aha inay ka soo baxaan wax shuruudaha kaarka (MA) ga ah marka laga reebo in Minnesota la degan yahay. Waxa ay xaq u yeelan ilaa aakhirka bisha sannad-guuradooda **dhalashada ee koowaad.** Uma baahnid inaad u dalabto 'durbaba ilmaha dhashay' kaar caafimaad. Laakiin waa inaad la xiriirto cayrta aadna u sheegto dhalashadda ilmahaaga, si kolkaa loogu bilaabo gelinta kaar caafimaad. Haddii ilmahaagu uu ku dhashay cisbitaal, waydiiso cisbitaalku in dhalashada ilmahaaga ay u sheegaan cayrta.

Waxaa ku jirta Akhbaar kale oo ku saabsan xaq u yeeladka Ilmaha Markaa Dhashay "MN Health Care Programs Eligibility Policy Manual" *(Buuga Yar ee Nidaamka Xaq u Yeeladka ee Barnaamijyada Caafimaad ee MN)* ee ku jira Shabakada (website) Waaxda Adeega Bulshada (DHS) ee: https://mn.gov/dhs. *(ingiriisi kaliya)*



**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**